

ayment  
cepted Here



or enter mobile number



# Xisaabta Socota ee Ardayga

*my*Bank  
Wherever you go

koontada noocaan ah waxaa loogu talo galay ardayda heerar kasta (Undergraduate iyo postgraduate), si loogu dhiirigeliyo inay goor horeba billaabaan adeegsiga bankiga, iyo la macaamilka hay'adaha maaliyadeed (Financial Institutions).

Ardaygu waxa uu heli karaa in koontadiisu u furnaato iyada oo aan wax khidmad sanadeed ah laga qaadin.

Ardayda leh xisaabta noocan ah, iyaga oo adeegsanaya MasterCard debit, waxay online kaga iibsan karaan adduunka oo idil buugaagta, cilmi-baarisyada (Maqal iyo muuqaalba), waxay rukuman karaan joornaalada sayniska iyo takhasusyada kale labadaba, waxay iibsan karaan koorsooyin waxbarasho, waxay ka qaybgeli karaan aqoon-is-weydaarsiyo, waxayna ku bixin karaan kharashaadka waxbarashada.

Sidoo kale, koontadani waxay u suurogelinaysaa ardayda in ay lacagaha iskuulka iyo jaamacadaha isaga bixiyaan hab online ah iyaga oo ka faa'iideysanaya (MyBank School fee payment service)

Ardayda leh akoonka noocan ah waxaa kale oo ay xaq u yeelan karaan maalgelinta fudud ee ardayda (Student microfinance).

## Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Waxaad kaga adeegan kartaa ama lacag ku siin kartaa dukaammada, Maqaayadaha, Xafiisyada dawladda, Shirkadaha gaadiidka, Hoteellada, Jaamacadaha, Telefishinnada, Iskuullada IWM.
- Jeeg buug ka kooban 50 xaashi.
- MasterCard debit aad u adeegsan karta transactions-ka gudaha iyo kuwa dibedda labadaba, iyada oo ardayga laga qaadi doono khidmad ka yar midda dadka kale laga qaado.
- Akoonkani ma leh wax lacag sanadle ah oo macmiilka laga qaadayo.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift, iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Si sahlan (Online ah) oo aad isaga bixin karto dhamaan biilasha iyo lacagaha kale ee laguugu soo dallaco sida biyaha, korontada, TV-ga, iyo qaybo kale oo badan.

- Waxa aad si bilaash ah u heli kartaa warbixinnada aan ka diyaarinno dhaqaalaha, waxaadna sidoo kale ka faa'iideysan kartaa talo-bixinnadeena ganacsi ee aan ardayda ugu talo galnay.
- Internet iyo Mobile banking kuu sahlaya in aad akoonkaaga maamulato goor kasta iyo goob kasta oo aad joogto.
- SMS lagugu soo wargelin doono dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.
- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- In aad lacagahaaga kala bixi karto ATM-yada bankiga.
- In aad ka faa'iideysan karto adeegga maalgelinta ardayga ee MyBank.
- Waad furan kartaa akoonkan xattaa haddii aadan isla markaas ku shubanayn lacag.
- Qasab maahan in aad akoonkan ku reebto haraa lacageed.
- In aad adeegyada bankiga si sahlan uga heli karto wakiilladeena ku firirsan meelo badan oo dalka ah.

## Shuruudaha Furista Akoonkan:

1. National ID, Passport ama document kale oo ay ansixiyeen hay'adaha ku shaqada leh.
2. Cinwaanka ama deegaanka macmiilka.
3. In macmiilku caddeyo meelaha dakhligu ka soo galo.
4. Sawirk-ka macmiilka.

 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 [info@mybank.so](mailto:info@mybank.so)

 [www.mybank.so](http://www.mybank.so)

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location  
Mogadishu, Somalia

*my*